



Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisi, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese la soo geliyay :

<https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Luulyo 23, 2021

Ku socota: Daneeyayaasha ODDS

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Ujeedada: Macluumaadka Cusub ee Saacadaha Wakhtiga Xagaaga

Aniga oo ku sii jeedna sanad dugsiyeed cusub, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka wuxuu rabaa in uu qoysaska iyo hay'adaha maamulka kiiska la socodsiiyo macluumaadka cusub ee ku saabsan saacadaha wakhtiga xagaaga.

Saacadaha wakhtiga xagaaga ee ku qoran Qiimeynta Baahiyaha Carruurta (CNAs) waxay sii ahaan doonaan kuwo dhaqan gal ah kuwaasi oo loogu talagalay carruurta helaysa adeegyada guriga dhexdiisa ama barnaamijka Adeegyada Carruurta ee Guriga Dhexdiisa ee Ballaaran (CIIS). Saacadaha adeeg bixiyaha waxaa la isticmaali karaa wakhti kasta oo maalintii ka mid ah sida ay hadba go'aamiyaan waalidka/mas'uulka ilmuhu, iyadoo ay ugu wacan tahay xaalada gaarka ah ee sanad dugsiyeedkan. Adeeg bixiyaha waxaa loo isticmaali Hawsha Nolol Maalmeedka (ADL) iyo Hawlaha Nolol Maalmeedka Muhiimka ah (IADL) oo kasta, hawlaha la xiriira caafimaadka, ama taageerada hab-dhaqanka ee lagu aqoonsaday ISP carruurta. Adeeg bixiyaha ma ahan in loo adeegsado hawlaha waxbarasho ama dugsiya guriga.

ODDS waxay bixin doonaa waqti badan waa wax hore la isku sii ogeysiyo marka saacadaha wakhtiga xagaaga dhammaadaan, inkasta oo aynaan filayn in ay yaraadaan ilaa laga gaarayo dhammaadka xaalada caafimaad ee degdega ah ee bulshada ee federaalka.

Qoysasku waa in ay la hadlaan Isku duwahooda Adeegyada wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan qiimeynta saacadaha wakhtiga xagaaga. [Macmuulaadka dhanka muuqaalka ah](#) oo loogu talagalay qoysaska oo ku saabsan saacadaha wakhtiga xagaaga ayaa sidoo kale la helayaa oo la turjumay oo ku jira [website-ka ODDS COVID-19](#), halka hoos timaada Ilaha loogu talagalay Dadka/Qoysaska.

Waad ku mahadsan tihiin wax kasta oo aad sameyso si loo taageero dadka qaba naafanimada maskaxda iyo korriinka.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa
<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.